Codsigaaga magangelyada ah

Warbixin ku saabsan dacwada qaxootinimada.

Maxaa laguu siinayaa waraaqahaan?
Waxaad rabtaa in aad Nederland magangelyo weydiisato. Magangelyo waxaa loola jeedaa: Badbaadin uu wadan kale uu badbaadinayo dadka wadankoodu aamin aan ku ahayn iyo aanay wadankooda ka heli karin badbaadin.

Haddii aad codsi magangelyo ah gudbiso , waxaad dowlada Nederland si rasmi ah u weydiisaneysaa in lagu siiyo sharci degenaansho. Sharcigaas waa mid aad u baahantahay si wadankan Nederland aad ugu noolaan kari lahayd. Codsigaaga magangelyada ah ayuu ka bilaabmayaa dacwada qaxootinamada; waa nidaam sharci ah oo ay dowlada Nederland ku qimeyneyso in adiga sharci lagu siinayo iyo in kale.

Waraaqahan waxaad ka akhrisan kartaa waxyaabaha dhici doona intay dacwadaasi socoto.Waxaa sidoo kale ku qoran waxa lagaa sugayo in aad sameyso (waajibaadka ku saaran) iyo waxa aad dowlada Nederland ka sugeyso oo ay kuu qabaneyso (xuquuqdaada).

Yaa badbaadin (magangelyo) Nederland ka heli kara?

Sharciga qaxootinimada

Wadanka Nederland sharciga ajaanibta waxaa ku qoran goorta aad heli kartid sharciga qaxootinimada. Waxaad sharci degenaansho ku heli kartaa haddii mid ka mid ah sifooyinka soo socda lagaa helo.

- Waxaad leedahay asbaab la rumeysan karo in wadankaagii aad ka timid laguugu daba geli karo keliyah qabiilkaaga, diinta aad aaminsantahay, jinsiyadaada, arimo siyaasadeed awgeed ama aad ka mid tahay koox gaar ah oo mujtamaca ka mid ah.
- Waxaad leedahay asbaab la rumeysan karo in wadankii aad asalkaa ka timid uga baqaneysid ciqaab dil ah ama toogasho ,jirdil ama nooc fal kale ah oo biniáadanimada ka baxsan ama sharaf dil ah oo ka jira wadankii aad ka timid.
- Waxaad leedahay asbaab la rumeysan karo oo aad u baqaneysid in dhibane aad ku noqoto wadankaagi waxyeelo kaasoo gaara dagaalada aan sababta lahayn ee ka socd xabadu iska kaa dhici karto.
- Hooyada, ama aabaha ayaa dhawaan sharci magangelyo ka helay Nederland.

Hayadda socdaalka iyo jinsiyadaha (IND) waxay go'aan ka gaarayaan in adiga shuruudaha lagu bixiyo sharciga qoxootinimada aad buuxisey.

Ururadee ayaad la kulmaysaa?

Jeugdbescherming voor vluchtelingen (**NIDOS**) Ururka badbaadinta da'yarta ajaanibta ah. Haddii aad adigoo da'yar ah oo waalid uusan kula socon wadankan Nederland timaado, waa in sida sharciga Nederland uu qabo la sameeyaa cidii masuul kaa noqon lahayd. Ururka badbaadinta da'yarta ajaanibta ah (NIDOS) waa hay'ada ku howlan arimaha masuuliyada da'yarta ajaanibta ah. Waxay si rasmi u codsanayaan in ay masuuliyadaada ay qaadaan. Ururka Nidos waxaa uu markaa ka dib qof ka mid ah shaqaalahooda u xil saaraysaa in uu kaa noqdo mas'uul. Qofkaasi shaqaalaha ah ayaa Nederland kuugu caawinaya. Mas'uulkaasi waxaa uu kaa caawinaya sida aad go'aan muhiim ah aad u gaari lahayd kuna dadaalaya sidii aad meel fiican oo aad ku noolaato aad u heli lahayd uuna kuu diyaarinaya waxbarasho iyo arimo kaloo badan. Sidoo kale qofkaasi kaa masuulka ah waxa uu kaa caawinayaa dacwadaada qaxootinimada ah, laakiin qofkaasi mas'uulka kaa ah saameyn kuma laha go'aanka IND. macluumaad dheeri ah oo ku saabsan qofkaasi mas'uulka kaa noqonaya waxaad ka heleysaa Nidos.

Centraal Orgaan opvang asielzoekers (**COA**). Xaruunta dhexe ee qaxootiga (COA) waxay qabtaan u gargaarida qaxootiga wadankan Nederland iyo arimaha la xiriira gargaarkaasi. haddii aad shan iyo toban jir ka yartahay, waxaad inta ay dacwada qaxootinimada socoto la noolaaneysaa qoys ku korsada. Haddii da'daada shan iyo toban ilaa siddeed iyo toban u dhexeeyso waxaad tagaysaa xero u gaar ah da'yarta megengelyadoonka ah ee COA. COA waxay kuu diyaarineysaa hooy, cunto iyo in caymiska caafimaadka aad hesho. Sido kale COA waxaad ugu soo hagaagi kartaa markaad rabto in dhakhtar la kulanto. COA waa urur madax banaan go'aana kama gaareyso dacwadaada magangelyada ku saabsan.

Daryeelka Caafimaad ee Magangelyodoonka (**GZA**) waa ururka aad u tageyso haddii aad xanuunsan tahay ama aad qabto su'aalo xagga caafimaadka. Rug kasta oo dejjinta ee COA waxaa ku yaal xaruun caafimaadka ee GZA. GZA waxa ay kuu sameynayaan ballamada kalkaaliyaha dhakhtarka, kalkaalisada caafimaad, caawiyaha rugta caafimaad ee GGZ ama dhakhtarka qoyska. Waxa aad habeen iyo maalin telefoon kula xiriiri kartaa xaruunta caafimaad 'de Praktijklijn' haddii aad su'aalo xagga caafimaadka qabto: 088 112 21 12. Ka bilow isniin ilaa iyo jimcaha waxaa aad nambarkaas u wici kartaa xitaa su'aalo aan caafimaadka quseyn. Sida tusaale ahaan marka aad u baahan tahay in dhakhtar taqassus ah laguu gudbiyo.

VluchtelingenWerk Nederland (**Ururka Gargaarka Qaxootiga Nederland**) waa urur madax banaan ee u taagan xuquuqda aadanaha waxaa loo asaasey in uu danaha qaxootiga ilaaliyo. VluchtelingenWerk (Ururka qaabilsan gargaarka qaxootiga)wuxuu kuu siinayaa warbixin iyo sharaxaad ku saabsan dacwada qoxootinimada, si shaqsi ah kuugu wargelinayaan, kaa garab istaagi sida aad ula socon lahayd dacwadaada iyo idiin dhexdhexaadinaya adiga iyo hay'adaha dhibaatada kaala dhaxeyso. Waxay arimahaan tan ku saabsan si dhow ula shaqeynayaan looyarkaaga. Ururka gargaarka qaxootiga (VWN) go'aan kama gaarayaan codsigaaga magangelyada ah.

Raad voor Rechtsbijstand (Golaha gargaarka xaquuqda sharciga ah). Golaha gargaarka xuquuqda sharciga ah waxaa ay hubinayaan in looyar ku caawina aad hesho haddii aadan iska bixin Karin kharashkiisa. Golaha gargaarka xaqa sharciga ayaa bixinaya kharashka looyarkaasi ku caawinaya. Looyarka uma shaqeeyo ururka gargaarka xaqa sharciga ah. Looyarka waa qof madax banaan oo xaga sharciga kaa caawinaya inta ay dacwadaada magangelyada ay socoto.

Immigratie- en Naturalisatiedienst (**IND**) (Hay'ada socdaalka iyo jinsiyada). Wasaarada cadaalada iyo amniga. Hay'ada socdaalka iyo jinsiyada (IND) waa qeyb ka tirsan wasaarada cadaalada iyo amniga ee Nederland. Shaqaalaha u shaqeya IND waxay kula yeelanayaan wareysiyo ku saabsan qofka aad tahay, jinsiyadaada, safarkaaga iyo sababihii kuugu kalifey in aad wadankaaga ka soo tagto. Waxaa ay baarayaan arimahaaga gaarka ah iyo xaalada uu ku sugan yahay wadanka asalkaa aad ka timid. Markaa ka dib ayay go'aaminayaa in adiga (si ku meel gaar ah) Nederland u joogi kartid, ama in aad dib ugu noqoto wadankii aad ka timid.

Beveiliging (ilaalinta). Xaruumaha IND iyo xerooyinka qaxootiga ee COA waxaa jooga waardiyayaal. Waxaad shaqaalahaasi ku garan kartaa dareeska ay xiran yihiin. Waxay halkaa u joogaa in ay sugaan amnigaaga. Waad weydiisan kartaa su'aalo ku saabsan waxyaabaha la ogol yahay ama mamnuuca ka ah guryahaasi iyo xaruumaha IND iyo kuwa COA. Shaqaalahaasi amniga sugaya saameyn kuma laha go'aanka laga gaarayo codsigaaga magangelyada ah.

Dienst Terugkeer en Vertrek
Ministerie van Veiligheid en Justitie

Dienst Terugkeer en Vertrek (**DT&V**) Hayáda dib u celinta iyo bixitaanka (DT&V) waa qeyb ka tirsan wasaarada cadaalada iyo amniga ee Nederland. Haddii aan lagu siin sharci degenaansho, ayuu qof shaqaale ka ah DT&V kaa caawinayaa sidii aad isugu habeyn lahayd dib ugu noqoshada wadankii aad asalkaa ka timid.

INTERNATIONAL ORGANIZATION FOR MIGRATION
IOM·OIM
THE UNITED NATIONS MIGRATION AGENCY

IOM Internationale Organisatie voor migratie (Ururka caalamiga ah ee hijrada) waa urur madax banaan oo caalamika oo dhan dadka hijrada ku jira caawina. IOM waxay kaa caawini karaan marka aad Nederland si iskaa ah u rabto in aad uga tagto. IOM waxay ku siinayaan warbixin wax ku ool ah oo ku saabsan dib u noqoshada iyo dib u degida, waxay kaloo kaa caawineysaa sidii aad Nederland uga bixi lahayd. Qof ka shaqeeyana ururka gargaarka qaxootiga ama looyarkaaga ayaad weydiisan kartaa in arinmahaan kaa caawiyaan.

Maxaa adiga lagaa sugayaa?

Waa muhiim in waqtiga lagu guda jiro howsha dacwadaada in aad sheegto warar wax ku kordhinaya asbaabta codsigaaga magangelyada ah. Waxaa kaloo lagaa sugayaa in dhamaan waxii cadeymo ah oo aad haysid ama heli kartid (dokumenti ama tusaale ahaan warqado xoojinaya warka aad sheegtey) aad tustid IND.

Haddii ay jiraan arimo adiga kuu gaar ah oo ay muhiim tahay in IND ay la socoto, markaa waa wax fiican in aad sida ugu dhaqsiyaha badan IND ugu gudbiso. IND markaa waxay isku dayayaan in sida ugu fiican ay kuu caawiyaan , si aad adiga u sii wadan lahayd codsigaaga magangelyada ah.

Dacwada qaxootinimada sida ay maalin kasta u dhaceyso

Maalinta balanta aad la leedahay IND waxaad tageysaa xafiiska IND, halkaa ayay ka bilaabmeysaa dacwadaada qaxootinimo.

Halkaas hoose ayaad ka akhrisaneysaa sida dacwada qaxootinamada maalin walba ay u dhacayso.

Maalinta 1: wareysiga hore

Waxaad si rasmi ula yeelatey sarkaal ka tirsan IND wadahadal ku saabsan qofka aad tahay, jinsiyadaada iyo safarkaaga. Wareysigaasi ayuu qofka IND ka socda sidoo kale su'aalo ku saabsan waaladiintaada iyo dadka kale ee adiga ku xanaanaynayey ka hor inta aadan Nederland iman kuugu weydiinayaa. Wadahadalkaasi waxaa lagu magacaabaa wareysiga koowaad. Haddii aad dooneyso, waad warsan kartaa ururka gargaarka qaxootiga ama qofka masuulka kaa ah in ay goob joog ka ahaadaan wareysiga koowaad.

Wareysigaasi inta aad ku jirto laguma weydiinayo su'aalo ku saabsan sababaha aad magangelyada u codsaneysid. Taa waxay dhacaysaa wareysigan kan xiga ee IND qof ka socda uu kula yeesho (arag maalinta 3aad). Shaqaalaha IND waxaa uu ku weydiinayaa tafaasiil badan si wax badan looga ogaado qofka aad tahay, halka aad ka timid iyo sidii aad Nederland ugu soo safartey. Su'aalo uu ku weydiinayo shaqaalaha IND ayuu sidoo kale ku baarayaa in aad runta shegeysid. Horay wareysi is dhiibista ma lagula yeeshay? Markaa sarkaalka ka tirsan IND wuxuu xaqiijinaayaa macluumaadkaada oo halkaasi aad ku sheegtay wuxuuna ku weydiinayaa su'aalo dhameystir ah. Sida ugu fiican isugu diyaari wareysiga hore. Mar keli yah ayaa fursad laguu siinayaa in si cad oo dhan aad u sheegto qofka aad tahay iyo halka aad ka timid. Soo gudbi mar kasta macluumaadkaaga saxda ah, taariikh dhalasho oo sax ah oo aan ahayn tan ku qoran dokumentiga falsada ee safarkaaga. Sidoo kale sheeg marka aad magac kale isticmaashey. Dokumentigaaga iyo sheekadaada waa labaarayaa in ay xaqiiq dhab ah yihiin iyo inkale. Haddii IND xaqiijiso in sheekadaada sax aanay ahayn ama dokumentigaaga aanay rasmi ahayn, waxay taasi saameyn ku yeelan karaan go'aanka IND in adiga sharci lagu siiyo iyo inkale.

Wadahadalada aad la yeelaneyso IND waxaa jooga turjumaan. Qofka IND ka socda su'aalaha afka Nederlands ayuu kuugu weydiinayaa. Turjumaanka ayaa su'aalahaasi af aad fahmeyso kuugu turjumaya. Turjumaanku jawaabaha aad bixisana afka Nederlanka ayuu u turjumayaa. Waa qof madaxbanaan turjumaanku sameyna kuma laha go'aanka laga gaarayo codsigaaga megengelyaada ah. Islamarkiiba hore u sheeg haddii adiga iyo turjumaanku si fiican aydaan isufahmeyn. Markaa qofka IND ka socda ayaa kuu keenaya turjumaan kale. Waa muhiin in aanu meesha qalad soo gelin oo ka imaanaya su'aalaha oo aadan si fiican u fahmin.
Waxaad heleysaa (la soo marsiin looyarkaaga) warbixintii lagaa qorey wareysigii koowaad.

Maalint 2: u diyaargarowga wareysiga labaad

Looyarkaagu wuxuu kuu akhrinayaa wixii wareysiga koowaad lagaa qoray. Looyarku wuxuu leeyahay qol u gaar ah oo xafiiska IND ku dhex yaal. Inta lagu gudo jiro wadahadalkan turjumaan ayaa idiin turjumaya waxa aad adiga iyo looyarka isleedihiin. haddii warbixinta wax ka dhiman yihiin ama si sax ah loo qorin wixii aad sheegtay, markaas looyarkaaga ayaa warqad ugu sheegaya IND arintaasi. Looyarkaaga waxaa uu kuu diyaarinayaa wareysiga labaad ee aad IND la yeelaneysid.

Maalinta 3: wareysiga labaad

Wadahadalka labaad ee qof IND ka mid ah aad la yeelato waxaa la dhahaa wareysiga dheer. Wareysigan waxaad ku sheegi kartaa sababaha kuugu kalifey in aad magangelyo codsato. Sidoo kale qofka IND ka socda su'aalo ayuu wareysigana kuugu weydiinayaa. Wareysigan sidoo kale waxaa lagu qabanayaa xafiiska IND. Waa muhiim in aad wax kasta aad sheegtid si ay IND u fahamto in aad badbaadin u baahantahay. Si daacad ah wax u sheeg, si buuxda oo dhan dhibaata kuugu dhacdey iyo sababta aadan badbaadin uga heleyn wadankii aad ka timid sheeg. Haddi dhacdooyinka qaarkood si dhan aadan u xasuusan karin, u sheeg sidaa qofka IND ka socda. Qofka ka socda IND wuu la socdaa xaalada guud ee wadankaaga ka taagan. Waa muhiim in aad sheegto xaalka adiga kuu gaarka ah iyo sababta aad badbaadin sida khaaska ah ugu baahantahay. U sheeg sidoo kale sida kuu suurtagalka ah tafaasil badan: xitaa waxyaabo yar yar muhiim ayay noqon karaan. Qofka IND ka socda su'aalo ayuu halkaasina kaa weydiinayaa.

Haddii calaamado korkaagu ku yaalaan, dhib xaga jirka ama maskaxda aad qabto oo xiriir la leh waxii ka dhacay wadankii aad ka timid, waa muhiin in aad arimahaasi qofka IND ka socda aad u sheegtid. Markaa IND waxay go'aan ku gaari karaan in adiga nuuc baaritaan ah (caafimaadka la xiriira) kuu soo bandhigaan haddii ay IND arintan u aragto in ay muhiim u tahay qiimeynta codsigaaga. Waad awoodaa in baritaan nuucaas ah aad iskaa u sameyso qarashkiisana aad iska bixiso. Looyarkaaga ayaa arintan kaa caawini kara.

Waa muhiim in wareysigan sidoo kale si waadix ah aad u sheegtid dadkii ku xanaanayn jirey ama aanay ku xanaanay ee wadankii aad ka timid ama aad ku noolaan jirtey. U sharax qofka IND ka socda sababta aad adiga sidaa ugu aragto Sidoo kale wareysigaan waxaa jooga turjumaan.

Looyarkaaga ama qofka kaa masuulka ah inta badan wey joogaan wareysigaaga. Waa la ogol yahay in dadkaa bedelkooda qof kale oo kaa wakiil ah soo kaxeysato. Sidoo kale waad warsan kartaa ururka gargaarka qaxootiga VWN) in ay goob joog ka ahaadaan wareysiga. Waxaad heleysaa (la soo marsiin looyarkaaga) warbixintii laga qorey wareysigan.

Maalinta 4: akhrinta wareysigii labaad

Looyarkaaga ayaad ka wadahadlaysaan warbixinta wareysiga labaad. Sidoo kale wareysigan turjumaan ayaa idiinka caawinaya tujumida wax alle waxii adiga iyo looyarka aad ku wada hadashaan. Haddii warbixintaasi wax ka dhiman yahay ama si sax aan ahayn u qorantahay, markaa looyarkaaga ayaa sidaasi warqad qoraal ah IND ugu gudbinaya.

Maalinta 5: go'aanka lagu tala jiro

IND waxay qiimeyneysaa in aad soo buuxisey sharuudaha sharciga qaxootinimada. Qiimeyntaasi waxii ka soo baxa ayay ku xiran tahay sida ay dacwadaada u sii soconeyso. Waxay noqon kartaa seddax xaaladood:

1. Waad soo buuxisey sharuudahii sharciga qaxootinimada. Waxaad heleysaa (la soo marin looyarkaaga) warqada IND (= go'aanka) oo ay ku qoran tahay in codsigaagi magangelyo la ogolaadey. Taa macnaheedu waa waad (si ku meel gaar ah) ku noolaan kartaa Nederland. Looyarkaaga ayaa kuu sharxaya saameynta adiga ay tani kuu yeelan karto.
2. IND waxay u baahantahay waqti dheer oo baarintaan ku sameeyaan oo sideed maalmood gudahood codsigaaga magangelyada ah go'aan ugama gaari karaan. IND dacwadaada waxay ku daraysaa dacwadaha mudda dheer looga howgalayo. Go'aanka laga gaarayo codsigaaga mar dambe ayuu noqonayaa. Waxaad heleysaa warbixin kale oo macluumaadka dacwada dheer ku saabsan.
3. IND waxay u aragtaa in aadan soo buuxin sharuudihii sharciga qaxootinimada. Waxaad heleysaa (la soo marin looyarkaaga) warqada IND oo ay ku qoran tahay in ay IND ku tala jirto codsigaaga magangelyada ah diido. Warqadaasi waxaa loo yaqaan go'aanka hordhaca ah. Warqadaasi waxaa sidoo kale ku qoran sababaha lagu gaarey diidmada lagu tala jiro iyo saameynta ay kuugu yeelanayso. Looyarkaaga ayaa warqadaani aad ka wadahadlaysaan.

Maalinta 6: aragtidaada (zienswijze)

Haddii IND ay ku tala jirto in codsigaaga magangelyada ah diido, looyarkaaga ayaad ka wadahadlaysaan ku talagalkaasi. Balan ayuu mar hore looyarkaaga kuu sameeyey oo arinkan ku saabsan. Looyarkaaga ayaa markaa ka dib IND si qoraal ah mowqifkiina u diraya. Taasi waa warqad oo aad si rasmi ah uga jawaabeysid ku tala galka IND aadna ku sheegi kartid sababta aadan uga raacsaneyn sida ay ku talajiraan.

Maalinta 7 iyo 8: go'aanka

Ka dib mar kala akhriyo aragtidaada ayay IND qiimeyneysaa in go'aankii ay ku tala jirtey in ay wax ka bedesho iyo in kale. Qiimeyntaasi waxii ka soo baxa ayay ku xiran tahay sida ay dacwadaada u sii socon doonto. Waxaad heleysaa (la soo marin looyarkaaga) warqad ay IND kuu wargelineyso waxii ka soo baxay qiimeyntaasi. Looyarkaaga ayaa kuu sheegaya saameynta ay tani kuugu yeelanayso. Waxay noqon kartaa afar xaaladood:

1. Ka dib markii la akhriyey qoraalka aragtidaada ayay IND la noqotey in aad buuxisey sharuudihii sharciga qaxootinimada. Waxaad heleysaa (lag soo marin looyarkaaga) warqada IND (=go'aanka) oo ay ku qoran tahay in codsigaagii magangelyo la ogolaadey. Waad (si ku meel gaar ah) u joogi kartaa Nederland. Looyarkaaga ayaa kuu sheegaya saameynta ay tani kuu yeelan karto.
2. IND waxay u baahantahay waqti dheer oo baarintaan ku sameyso oo sideed maalmood gudahood codsigaaga magangelyada ah go'aan ugama gaari karaan. IND dacwadaada waxay ku daraysaa dacwadaha mudda dheer looga howgalayo. Waxaad heleysaa warbixin kale oo macluumaadka dacwada dheer ku saabsan.
3. IND waxay ku adkeysaneysaa aragtideedii ahayd in aadan soo buuxin sharuudihii sharciga qaxootinimada. Waxaad heleysaa (laguu soo marinayaa looyarkaaga) warqada IND (=go'aanka) oo ay ku qoran tahay in ay IND codsigaaga magangelyada ah diidey. Warqadaasi waxaa la socda oo lagu siinayaa warbixin gooni ah oo ku saabsan saameenta ay diidmada leeedahay, iyo maxaad kaga hor tegi kartaa iyo fursadaha dib u noqosho. Go'aankaasi waxaa sidoo kale ku qoran sababaha lagu gaarey diidmadaasi iyo saameynta ay kuugu yeelanayso. Looyarkaaga ayaa kaala hadlaya go'aankaasi.
4. IND waxay feelkaaga ku wareejineysaa Hay'ada dib u celinta iyo bixitaanka (DT&V). waxay kula yeelanayaan wadahadalo la xiriira bixitaanka iyo waxay baarayaan yaa kuugu xanaanaynaya wadankii aad asalkaa ka timid ama aad horey ugu noolaan jirtey. Haddii aad la shaqeyso wadahadaladaasi iyo baaritaankaasi iyo DT&V ay u aragto in aadan waxba ka qaban karin dib ugu noqoshada wadankii aad ka timid, markaa DT&V sidaa ayay IND ku wargelinayaan. IND ayaa markaa kuugu yeeraysaa in aad codsi sharci degenaansho ah oo lagu bixiyo dhibaato aadan adiga keenin 'buitenschuld' looguna tala galay da'yarta aan lala socon aad soo codsato.

Codsigaaga oo aad dib ula noqdo

Waad awoodaa in aad marka aad rabto ka noqoto codsigaaga. Haddii xaalku sidaa yahay waxaa fiican in aad looyarkaga la xiriirto, qofka kaa masuulka ah ama aad toos ula xiriirto IND. Haddii aad codsigaaga IND kala noqoto, taasi waxay keeneysaa in aadan sii joogi Karin Nederland, marka laga reebo in sabab kale laguugu ogolanayo in aad sii joogto.
Ma ka noqotay codsigaada magangelyo mana jiraan miyaa sababo kale oo aad Nederland ku joogi karto? Markaa waa in aad u noqotaa waddankaada aad ka timid. Waxaad joogeysaa xugta dejjinta inta safarkaada dib u noqoshada uu ka bilaabanaayo. Kaddib marka aad la noqoto codsigaad magangelyo mar kasta waxaa weli kuu macquul ah in aad codsi magangelyo cusub aad sameeyso.

Dacwada qaxootinimada ka dib

Haddii IND codsigaaga magangelyada ah ogolaato, waa laguu ogol yahay in aad (si ku meel gaar ah) Nederland ugu noolaato, waxaa lagu siinayaa sharciga degenaansho. Nidos-ta ayaa degaan kuu habeyneysa kaas oo ah degaan dad kooban loogu tala galay, haddii ay da'daada 15 jir tahay ama aad ka weyn tahay. Haddii aad qof weyn tahay xitaa waad shaqeysan kartaa, gurina aad u raadsan kartaa. COA ayaa kaa caawineyso sidii aad ku heli lahayd guri aad ku noolaato. Ilaa iyo inta aad ka hesho guri kaaga ah xeryaha COA waad ku noolaan kartaa. IND ayaa kuu wargelineysa xuquuqdaada iyo waajibaadka laguugu leeyahay ka dib marka codsigaaga magangelyo la ogolaado. Qofka kaa mas'uulka ah iyo shaqaalaha ururka gargaarka qaxootiga waxay kaa caawini karaan sidii aad ku heli lahayd hay'adaha kala duwan muhiimkana kuu ah, tusaale sidii aad u heli lahayd guri, waxbarasho ama shaqo. Sidoo kale uu VWN kaa caawini karaa in laguu keeno qoyskaaga dadka ka midka ah.

Haddii IND ay diido codsigaaga magangelyada ah, waxaad yeeli kartaa adigoo la tashanaya looyarkaga in aad go'aankaasi kaga dacwooto garsoore Nederland ah. Taa macnaheedu waa in aad si rasmi ah ugu gudbineysid garsooraha in aadan ku raacsanayn go'aanka ay IND gaareen. Waxaad kaloo garsooraha weydiin kartaa in adiga inta ay dacwada socoto Nederland aad joogi kartid. Looyarkaaga ayaa arimahan kaa caawinaya. Garsooraha waxaa uu markaa ka dib baarayaa in IND sharciga Nederland si sax ah u dhaqangelisey go'aankii ay ka gaartey codsigaaga magangelyada ah. Waad ku sugi kartaa xaalado badan go'aanka garsooraha Nederland.

Haddii IND ay diido codsigaaga magangelyada ah, adigana go'aankaasi garsoore aadan kaga dacwoonin, markaa waxaad heysataa sida caadiga ah 28 maalmood in aad Nederland uga baxdid. Adiga ayaa si shaqsi ah uga masuul ah dib ugu noqoshada wadankii aad asalkaa ka timid. Haddii waqtigii laguu qabtey gudahiisa si iskaaga ah ugu bixin, si qasab ah ayaad wadankii aad asalkaa ka timid ugu noqoneysaa. Hay'adda dib u celinta iyo bixitaanka (DT&V) ayaa kaa caawineysa u diyaargarowga bixitaankaaga. Waxa aad joogeysaa rugta dejjinta inta aan weli safarkaada dib u noqosho aan la hirgelinin.

Haddii IND codsigaaga magangelyada diido, waxaad heleysaa warbixin gaar ah oo ku saabsan dib ugu noqoshada wadankii aad asalkaa ka timid. Haddii aad rabto in aad si iskaa ah dib ugu noqotid wadankii aad ka timid, markaa waxaad la xiriiri kartaa hay'adda caalamiga ah ee hijrada (IOM). Waxay (IOM) ku siin kartaa macluumaad wax ku ool ah kaana caawinayaan bixitaankaaga. Sida badan (IOM) waxay leeyihiin waqti loo tago oo wadahadal lala yeelan karo oo xeryaha qaxootiga guduhood ah, xitaa magaalooyinka qaarkood waxaad balan la sameysan kartaa qof la shaqeeya IOM. Ka dib dacwada qaxootinimda xitaa waad kala xiriiri kartaa macluumaad iyo caawinaadba qofka masuulka kaa ah iyo ururka gargaarka qaxootiga (VWN).

Sharci dhibaato aan dhankaaga ahayn

Sharci degenaansho

Da'yarta magangelyada doonaya ee keligood socda waxaa loogu tala galay siyaasad gaar ah. Haddii ay cadaato in seddax sano gudahood ka dib marka aad codsigaaga magangelyada ah soo gudbisey, aadan dib ugu noqon karin wadankaagii hooyo weliba aadan adiga arintani waxba ka qaban karin, waxaad heli kartaa sharci degenaansho oo gaar ah. Si aad sharcigan gaarka ah, ee lagu magacaabo sharciga dhibaatada aan dhankaaga ahayn lagu qaato 'buitenschldvergunning' aad xaq ugu yeelato waa in aad soo buuxisaa sharuudahan soo socda:

- Codsigaaga magangelyada waa la diidey
- Markii ugu horeysey isdhibidaada 15 jir waad ka yarayd
- Waad ka yar tahay 18 jir xaasna ma lihid
- Keli baad Nederland ku joogtaa, waalidiin kulama socdaan ama qof dibada masuul kaa ahaa.
- Ma jiraan dad ama hay'ado oo adiga kugu xanaanayn kara wadankii aad asalkaa ka timid ama aad ugu soo noolayd.
- Waad (keligaa, ama iyadoo uu kuugu wehliyo qofka masuulka kaa ah 'voogd' ama qof kaloo weyn) la shaqeysey dib u noqoshada
- Kuma noqon kartid dhibaato aan adiga dhankaaga ka iman darteed wadankii aad asalkaa ka timid ama wadan kale oo aad aadi kartid tusaale, sababtoo ah horey baad ugu noolaan jirtey.

Waa suurtagal in ay cadaato in aad sharuudahan buuxisey, ka hor inta aanay seddax sano dhamaanin laga bilaabo codsigaagii magangelyada.

Xitaa haddii aad ka weyneed 15 jir markii aad Nederland codsi magangelyo ah u gudbisey, waa buuxin kartaa sharuudaha sharci lagu bixiyo daruufaha adiga kaa baxsan. Waa sidaa xaalka haddii aad si ku filan aad IND ugu cadaysey in aadan dhab ahaantii dib aadan ugu noqon karin wadankii aad adiga asalkaa ka timid. Waa kuwan sharuudahaasi:

- Dowlada wadankii aad asalkaa ka timid ama dowlada wadankii aad ku noolaan jirtey, aanay adiga kuu ogoleyn in aad ku noqoto.
- Waxaad adiga muujisey sidii aad u helilahayd wadashaqeynta dowladahaasi ama dokumentiyada loo baahan yahay ee safarka.
- Sabab caafimaad darteed ma bixi kartid

Ha'adda socdaalka iyo jinsiyadaha (IND) ayaa go'aan ka gaaraysa in aad buuxisey sharuudaha lagu helo sharci degenaansho oo lagu bixinayo dhib aan dhankaaga ahayn ee loogu tala galay ajaanibta da'yarta ah ee magangelyada doonaya.

Sharci degenaansho ee loogu talagalay dhibanayaasha tahriibka

Waad heli kartaa sharci degenaansho oo waqti cayiman ah haddii aad tahay dhibane tahriib lagu keeney. Kaasi waa sharci degenaansho oo ku meel gaar ah. Markaa waa in sharuuda soo socda aad soo buuxisaa:

- Waxaad tahay dhibane dadka ka ganacsada dadka ay tahriib ku keeneyn
- Waad sheegtey ama qaabka kale ayaad ula shaqaysey in dembigaasi lagu daba galo ama baaritaanka lagu baadi goobayo tuhunsanuhu in dembigaasi lagu soo oogo aad la shaqeysey.
- Waxaa jira baaritaan lagu ogaanayo dembigaasi ama baaritaan lagu daba gelayo tuhunsanuhu in uu dembigaasi galey dembigaas oo laga soo gudbiyey ashtako ama aad adiga qaab kale wadashaqeyn ugu fidisey.

Ha'adda socdaalka iyo jinsiyadaha (IND) ayaa go'aan ka gaaraysa in aad soo buuxisey sharuudaha lagu helo sharci degenaansho ee dhibanayaasha ka ganacsiga dadka.

Ka hawl galka macluumaadka shaqsiga

Macluumaadka shaqsiga waa warbixinno kala duwan oo adiga kuugu saabsan. Hey'adaha oo buuggan warbixinta ka wada shaqeeyay waxa ay ku xusan yihiin xagga hoose. Hey'adahaan waxa ay ka hawl galaan macluumaadka shaqsiga inta uu socoto codsigaada magangelyo, weydiisigaada ama is xaadirintaada. Iyaga ayaa ku weydiinaayo macluumaadkaada iyo hey'ado kale iyo dad kale haddii loo baahdo. Hey'adahaan waa ay isticmaalaan waana ay keydiyaan macluumaadkaada waxa ayna u gudbiyaan hey'ado kale haddii ay taasi sharciga waafaqsan tahay. Sharcibixinta xogta shaqsiga waxaa ku yaal waajibaadka hey'adaha ka hawl galo macluumaadkaada. Waa in ay tusaale ahaan, si taxadder leh oo amaankeeda sugan yahay u adeegsadaan macluumaadkaada. Sharcibixinta xogta shaqsiga waxaa kaloo ku yaal xuquuqdaada, tusaale ahaan:

- in aad aragto ogaatana macluumaadkaada hey'adaha la yaal;
- in aad ogaato waxa ay hey'adaha ku sameyaan macluumaadkaada iyo sababta;
- in aad ogaato hey'adahee loo gudbiyay macluumaadkaada.

Ma dooneysaa in aad dheeraad ka ogaato ka hawl galka macluumaadkaada shaqsiga iyo xuquuqdaada? Markaa eeg websiteyada hey'adaha. Xagga hoose ee buuggan warbixinta ka akhriso ciwaannada websiteyada.

Su'aalo inta badan laysweydiiyo

Goorma ayaan wareysiga ugu horeya IND la leeyahay?
Ka dib marka aad isku dhiibto booliska ajaanibta waxaad leedahay ugu yaraan seddax usbuuc oo waqti ah in aad isku diyaariso dacwada qaxootinimada. Laakiin waxay noqotaa ugu yaraan seddax usbuuc ka hor inta ay wareysiga hore IND kula yeelanayso. Xerada qaxootiga ee tan xigta ee (COA) ama reeka ku korinayay ayay IND warqad kuugu soo direysaa oo ay kuugu balaminayaan wareysiga hore.

Intee Ayaan sugayaa go'aanka IND?
Dacwada qaxootinimada waxaa ay socotaa ugu yaraan sideed maalmood. Xafiisyada IND sida caadiga ah malmaaha sabtida iyo axada wey xiran yihiin oo ma ah maalmo la shaqeeyo. Mararka qaarkood IND sideed maalmood gudahood go'aan kuma gaari garto, sababta oo ah tusaale adiga oo inta dacwada ay socoto xanuunsada. Marka uu xaalku sidaa yahay IND lix maalmood ayay ku darsan karaan si ay codsigaaga magangelyada ah go'aan uga gaaraan.

Sidoo kale IND waxay go'aansan karaan in codsigaaga magangelyada ay ugu howlgalaan sida dacwadaha mudada dheer qaata. Haddii xaalku sidaa yahay waxay ku qaadanaysaa ugu badnaan lix bilood laga bilaabo maalinta aad saxiixdo codsiga magangelyada in IND go'aan uga gaarto codsigaaga magangelyada ah. Waxaad markaa heleysaa warbixin kale oo macluumaad ku saabsan dacwada dheeraata aad ka heleyso. Haddii IND aanay lix bilood gudaheed go'aan ku gaari Karin, way kuugu wargelinayaan IND sidaasi. Haddii aanay IND lix bilood ka dib marka codsigaaga magangelyada aad gudbisey weli go'aan kuu soo dirin islamarkaasi aadan wax wargelin ah ka helin? Markaa warqad waad ku warsan kartaa IND in laba todobaad gudahood go'aan ay uga gaaraan codsigaaga magangelyada ah. Looyarkaaga ayaa kaa caawini kara arintan. Dalab uu looyarkaaga gudbiyo darteed ayuu garsooraha markaa ka dib go'aan ka gaari karaa in IND ganaax ay ka bixiso maalin kasta oo aanay go'aan ka gaarin codsigaaga.

Waxaan door bidayaa in aan sheekadeydu qof dumar ah u sheegto. Sidaa ma la ogol yahay?
Wadankan Nederland xiriirka raga ama dumarka ee nolol maalmeedka ku saabsan ma diidi kartid. Mujtamaca Nederland raga iyo dumarka si siman ayaa loola dhaqmaa. Sidaa ayaan adigana kaa filaneynaa. Laakiin haddii aad jeceshahay in aad qof dumar ah oo IND ka socda aad kala hadasho sababta aad magangelyada u codsaneysid, markaa waxaad sidaa ka sheegi kartaa wareysiga hore ee aad IND la yeelato. Markaa IND waxay isku dayaysaa in wareysiga labaad qof dumar ah oo turjumaan kuu noqota ay joogto. Ma qof rag ah ayaad jeceshahay in aad sheekadaada u sheegato? Sidoo kale wareysiga koowaad ayaa sidaa ku sheegi kartaa. Markaa IND waxay isku dayaysaa in wareysiga labaad qof rag ah oo turjumaan kuu noqda uu joogo.

Maxaan sameeyaa haddii aan xanuunsanayo?
Haddii aad xanuunsantahay ama aad uur leedahay, u sheeg sidaa kalkaalayaasha caafimaadka marka ay baaritaanka ee tala bixinta caafimaadka ah ay kula yeeshaan (arag warbixinta: inta aadan dacwada qaxootinamada bilaabin). Arintan aad ayay muhiim u tahay haddii aad cudurada laka qaado aad qabto ama aad u malayneysid, sida tiibishada, isnidaamiska ama cudurada beerka. Wax kasta oo aad kalkaaliyaasha caafimaadka u sheegto si qarsoodi leh ayaa loola dhaqmayaa. Kalkaaliyaasha caafimaadka macluumaadka caafimaadkaaga uma gudbinayaan dad kale weligood adigoon ogolaan. Haddii aad u aragto in ay fiicantahay in kalkaaliyaasha caafimaadka macluumaadkaaga caafimaad IND u gudbiyaan, markaa waa suurtagal in IND arinkan wareysiyada ay ku soo qaataan.

Haddi inta dacwada magangelyada ah ay socoto aad xanuunsato, u sheeg sidaa qofka kaa masuulka ah, qof ka mid ah shaqaalaha COA, IND ama ururka gargaarka qaxootiga (VWN). Waxay ayagu kaa caawini karaan daryeel caafimaad sidii aad ku heli lahayd. Haddii aad xanuunsato maalinta balanta aad la leedahay IND ama looyarkaaga, weydiiso markaa qofka kaa masuulka ah 'voogd'ama qof shaqaalaha COA ka tirsan in uu xanuunkaaga u gudbiyo looyarkaaga ama IND.

Ma qabtaa weli su'aalo ka dib marka aad warbixintaan akhrisato?
Su'aalahaasi waxaad weydiin kartaa qofka mas'uulka kaa ah 'voogd', looyarkaaga ama qof ka tirsan shaqaalaha COA, IND ama ururka gargaarka qaxootiga (VWN).

Cabasho ma qabtaa?
Dhamaan hay'adaha ku shaqada leh dacwada qaxootinimada, u shaqeeyaan in si xirfad iyo taxadir leh. Haddii aad u aragto in hay'ad aanay si fiican kuula dhaqmin, markaa cabasho waad ka gudbin kartaa. Looyarkaaga ama qof ka tirsan (VWN) ayaa arintan kaa caawini kara.

Daabacadan waxaa si wada jir ah u soo saaray:
Xaruunta dhexe ee qaxootiga (COA) I www.coa.nl
Hayáda dib u celinta iyo bixitanka (DT&V) I www.dienstterugkeerenvertrek.nl
Hay'ada socdaalka iyo jinsiyadaha (IND) I www.Ind.nl
Golaha gargaarka xaquuqda sharciga (RvR) I www.rvr.nl
Ururka gargaarka qaxootiga Nederland I www.vluchtelingenwerk.nl

Oo ka wakil ah:
Wasaarada cadaalada iyo amniga, qeybta siyaasada hijrada www.rijksoverheid.nl

Daabacadan waxa ku qoran xuquuq kuma sheegan kartid. Haddii turjumida ay keento fasiraad kala duwan waxaa la raacayaa kan afka Nederlaanka ah.